

Macluumaadka ku saabsan tallaalka Covid-19

Mudanayaasha iyo Marwooyinka dagan gobolka Schaffhausen

Iska tallaal!

Adiga iyo qoyskaagaba cudurkan halista ah.

Cudurka corona ayaa si baaxad leh ugu faafay Swiiska oo dad badan ayaa la ildaran. Nasiib wanaag, waxaa jira tallaallo naga ilaaliya cudurka. Laba cirbaddood oo afar toddobaad u dhaxayso ayaa loo baahan yahay tallaalka. Intaas ka dib, waxaad heleysaa difaac wanaagsan oo ka dhan ah kala duwanaanshaha Cudurka sida Delta.

Tallaalku aad buu u sahlanyahay. Waxyeellooyinka ka iman karana waxaa ka mid ah (xanuunka goobta iska talaashay, madax-xanuun, qandho) waxayna ku haynaysaa waqti yar. Calaamadahan caadi ahaan aad bay uga yar yihiin marku kugu dhaco corona. Tallaalku wax Saameyn ah oo hada la arkay majirto hadhowna lama filayo.

Waxaan rabnaa inaan ugu dambeyntii ka baxno masiibada oo aan ku soo laabanno nolosha caadiga ah. Sidaas awgeed waxaan u baahanahay tallaalka

Tallaalku waa lacag la'aan. Shahaadada tallaalkuna waxay fududeyneysaa socdaalka dibadda waxayna dammaanad ka qaadaysaa inaad tagi karto meeshaad rabtid sida Xafladaha iwm.

Waxaan rajeyneynaa inaan idiin ku soo dhaweyno xarunta tallaalka ee Charlottenfels. Helitaanka tallaalku waa mid aad u fudud oo toos ah, hadaad rabtid inaad is diiwaangelisid iyo hadii aadan rabinba.

Waad Salaamantihin

Kooxda tallaalka Covid-19

Sideen isku tallaali karaa?

Fadlan soo qaado kaarkaaga aqoonsiga iyo kaarka caymiska Caafimaadka

Tallaal isdiiwaangelin la`aan:

Waxaad si fudud u imaan kartaa xarunta tallaalka waqtiyada loo gu talagalay:

- Isniin 17 – 20 Uhr
- Talaado 17 – 20 Uhr
- Jimce 14 – 20 Uhr
- Sabti 9 – 13 Uhr

Telefankan **052 632 65 57** wac oo ka qabso balanta talaalka

Balamaha xiligaad rabtid online ka dalbo

Bogga www.sh.ch/corona waxaad hadda kala dooran kartaa waqtiga iyo taariikhda tallaalkaaga koowaad iyo kan labaadba.

Xitaa haddii tallaalku uu kahortag fiican u yahay Cudurka, waxaa muhiim ah inaad sii waddo u hoggaansanaanta xeerarka nadaafadda iyo habdhaqanka lagu taliyay.